



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Noofambar 6, 2020

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS, oo ay ka mid yihiin dadka iyo qoysasku

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Subject: Qorshaha tallaalka ee ODDS COVID-19

Waxaan dhawaanahan helaynay weydiimo ka socda daneeyayaasha oo ku saabsan muqtaqbalka tallaalka COVID-19 iyo sida dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) loogu dari dooni qorshaha tallaalka ee Oregon. Waaxda Maamulka Oregon ayaa dhawaan qorshaha Oregon oo hordhac ah u gudbisay Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka (CDC). Qorshahaasi waxaa ka mid ah xog ay bixisay ODDS.

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon (ODDS) wuxuu Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) kala shaqeynayaa qorshaha tallaalka ee Oregon si loo xaqiijiyo in dadka waaweyn ee qaba I/DD lagu daro qorshaha kama dambeysta ah. Waanu ku kalsoonahay in dadka waaweyn ee qaba I/DD mudnaanta la siin doono marka tallaalku noqdo mid la heli karo, oo ay weheliyaan kuwa kale ee loo arko in ay halis sare ugu sugan yihiin natiijooyin xun ee ka soo baxa cudurka COVID-19.

OHA waxay xaqiijisay in carruurta aysan qayb ka ahayn qorshayaasha hore ee tallaalka COVID-19 iyada oo sababtu tahay carruurta oo aan qayb ka ahayn tijaabooyinka tallaalka umana badna in muhiimada la siiyo ilaa xog dheeraad ah laga helayo. Waa muhiim in la ogaado in aanan qofna, oo ay ku jiraan dadka qaaba I/DD, looga baahnaan doonin in ay helaan tallaalka. Waxaan filaynaa in uu noqon doono mid si adag loogu talinayo, oo aanan ahayn mid la iskaga baahan yahay.

ODDS waxay sii wadi doontaa in ay macluumaadka cusub la socodsiiiso daneeyayaasheena marka aan hayno macluumaad dheeraad ah. Waad ku

mahadsan tahay shaqadaada iyo taageeradaada dadaalada caafimaad iyo ammaan inta lagu jiro waqtigani.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.